

Sida loo soo celiyo warqada codeynta maqnaanshaha ee doorashada – Doorshada koowaad Agoosto 2-deeda

Marka waxaad dhameystirtey ku codbixinta warqada doorashada ee maqanaanshaha, oona aad gelisey baqshad lagu celiyo oona aad saxiixday dhanka kore ee baqshada. Talaabada ugu dambeysa waa muhiim. Waxaa qasab ah in aad saxiixdo dhanka kore ee baqshada.

Marka aad sameyso intan, waxaad haysataa ikhtiyaaro yar oo aad ugu celiso karaanigaaga.

Haddii ay tahay ka hor **Luulyo 18-deeda**, waxaad ku diri kartaa boostada. Intaa kadib, waxaan kugula talinaynaa in aad ku dirin boostada, lacala haddii ay jiraan dib u dhacyo boosto.

Ikhtiyaaradaada kale waa in aad u keenta waraaqadahaaga codbixinta xafiiska karraanigaaga, ama mid ka mid ah sanduuqyadooda lagu rido warqada doorashada. Waxaa laga yaabaa in ay ku soo dhejiyaan dhismayaasha ama meelaha istaaga xorta ah. Qaar waxaa laga heli kara ayagoo la wareejinaayo iyo ayagoo meal la dhigi kara.

Waxaad ka heli kartaa goobta xafiiska karraanigaaga iyo sanduuqyada lagu rido barta **Michigan.gov/Vote**. Xusuusnow, ma keeni kartid warqadaada doorashada si aad ugu rido sanduuq caasimad ama magaalo kale yaala. Xaqiji in aad u socoto sanduuqa saxda ah ee lagu rido adigoo booqanaya **Michigan.gov/Vote** ama adigoo wacaya karraanigaaga.

Hab kasta oo aad isticmaaleysa ee aad ku celinayso warqada doorashada, waxaad ka dabagali kartaa halkan goorta ay gaartey karraanigaaga **Michigan.gov/Vote**.

Hadba sida dhakhsiyaha badan ee aad ugu soo celin karto warqadaada doorashada, ayaa hadba gacan ka geysanaysa habsami u socodka doorashada ee qof walba.